

MN.GOV/RecordRelief

HABKA TIR-TIRIDA DAMBIYADDA XASHIISHKA IYO SU'AALO

# WAA MAALIN CUSUB

Gobolka Minnesota waxa uu dib u eegis ku sameynayaa diiwaanada xashiishka la xiriira, kumanaan kiis ayaa horay looga saaray (waxaa laga saaray aragtida dadweynaha).

MINNESOTA

MN.gov/RecordRelief

# SU'AALO

## WAA MAXAY TIR-TIRIDU?

Tir-tiriddu waxa ay ka dhigan tahay in wax laga saaro ama la tirtiro. Xaaladdan, waxay la micno tahay in qaar ka mid ah kiisaskii hore ee la xiriiray xashiishka la xidhikaro oo aanay ka muuqan doonin inta badan baaritaannada taariikhda dambiyada. Kumanaan dambiyo oo  xashiish la xiriira (xukunno khafiif ah iyo dambiyo gaar ah oo aan keenin xukun) ayaa hore si toos ah loo xidhay. Kiisaska adag, dambiyada khafiifka ah  iyo kuwa culus waxa hadda dib u eegis ku haya Guddiga Tir-tirista Dambiyada xashiishka.

## WAA MAXAY GUDDIGA TIR-TIRISTA DAMBIGA XASHIISHKA?

Guddiga Tir-tirista Dambiyada Xashiishka (CEB) waxa loo abuuray si uu dib u eegis ugu sameeyo dambiyada culus iyo qaar ka mid ah dambiyada fudud iyo dambiyada dhexe. Waxaa jira qiyaastii 110,000 kiis oo dib loo eegi doono. Shaqadan waxa la filayaa in ay qaadato dhowr sano si loo dhammeeyo.

## MA U BAAHANAHAY IN AAN CODSADO SI RIKOODHKEYGA LOO EEEGO?

Maya, uma baahnid inaad codsato. Guddiga Tir-tirista Dambiyada Xashiishka waxa uu si toos ah u eegi doonaa rikoodhada iyadoo la eegayo u-qalmitaanka. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad codsato si dib u eegis hore loo sameeyo. CEB waxa uu si dhakhso ah u eegayaa kiisaska isagoo si taxaddar leh mid mid u fiirinaya rikoodh kasta. Tani waxay qaadan kartaa waqti, gaar ahaan kiisaska adag. Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo si aad ugu codsato dib u eegis, fadlan booqo: **mn.gov/ceb**.

## MAXAA KA DHIGAN TIR-TIRISTA DAMBIGA XASHIISHKA XAGAYGA?

### DAMBIYO FUDUD

Haddii aad leedahay xukun hore oo dambi fudud ah oo la xiriira xashiish, rikoodhkaaga waxaa laga yaabaa in hore loo xidhay. Waaxda Amniga Dadweynaha ee Minnesota Xafiiska La-dagaallanka Dambiyada waxa uu tir-tiray qiyaastii 57,000 rikoodh oo la xiriira xashiishka. Tag **chs.state.mn.us** si aad u hubiso haddii taariikhdaada dambiyada la xidhay. Qaar ka mid ah xukunada dambiyada fudud ee xashiishka looma oggola tir-tirid.

### DAMBIYO CULUS

Guddiga Tir-tirista Dambiyada Xashiishka waxa uu dib u eegi doonaa dambiyada culus ee u qalma tir-tirid iyo sidoo kale qaar ka mid ah dambiyada fudud iyo dambiyada dhexe. Waxaa jira qiyaastii 110,000 kiis oo dib loo eegi doono. Kiisaskan ma aha kuwo si toos ah loogu tir-tiri karo, waxaana loo baahan yahay hannaan dib u eegis oo qoto dheer oo qaadan doona dhowr sano in la dhammaystiro. Fadlan booqo **mn.gov/ceb** wixii faahfaahin dheeraad ah.

FIIRO GAAR AH: Macluumaadka halkan lagu bixiyay looguma talagalin in loo isticmaalo talo sharciyeed ahaan.
Waa inaad la hadashaa qareen haddii aad u baahan tahay caawimaad.